

Nidaamka Codsiga Baaritaanka Taariikhda Qofka



Wakhtiga farsamayntu wuu kala duwanaan karaa iyadoo ku xiran helitaanka ballamaha iyo shuruudaha dib-u-eegista.



1. Codsiga la Gudbiyay

Codsaduhu wuxuu codsigiisa baaritaanka taariikhda qofka ku gudbiyaa MERIT.



2. Tilmaamaha Faraha laga Qaado oo la Diray

The Department of Children, Youth, and Families (Waaxda Carruurta, Dhallinyarada iyo Qoysaska, DCYF) waxay heshaa codsiga oo waxay codsadaa iimayl ugu dirtaa tilmaamaha ballansashada ballanta faraha laga qaadayo.



3. Faraha laga Qaadayo

Codsaduhu wuxuu ballansadaa oo ka qayb galaa ballanta faraha laga qaadayo. Marka faraha la qaado, waxaa loo diraa gobolka iyo federaalka si loo farsameeyo.



4. Dib-u-eegista Gobolka iyo Federaalka

The Washington State Patrol (Ciidanka Ilaalada Gobolka Washington, WSP) iyo Federal Bureau of Investigation (Xafiiska Baarista Federaalka, FBI) waxay dib u eegaan faraha waxayna natiijooyinka ku celiyaan DCYF si dib-u-eegis dheeraad ah loogu sameeyo.



5. Dib-u-eegista DCYF iyo Go'aanka Oggolaanshaha

DCYF waxay dib u eegtaa natiijooyinka baaritaanka taariikhda qofka waxayna go'aamisaa haddii loo baahan yahay dib-u-eegis dheeraad ah.



Haddii aan loo baahnayn dib-u-eegis dheeraad ah:

DCYF waxay go'aanka kama dambaysta ah ee oggolaanshaha ku soo saartaa MERIT, codsadahana waxaa lagu ogeysiiyaa iimayl.

Celceliska guud ee wakhtiga farsamaynta:
12 maalmood



Haddii loo baahan yahay dib-u-eegis dheeraad ah:

DCYF waxay dhammaystirtaa qiimaynta ku habboonaanta ka hor inta aysan go'aanka kama dambaysta ah ku soo saarin MERIT. Codsadaha waxaa lagu ogeysiiyaa iimayl marka nidaamku dhammaado.

Celceliska guud ee wakhtiga farsamaynta:
30 maalmood

Si aad u hesho nooca ugu dambeeyay ee daabacaaddan, booqo dcyf.wa.gov/publications-library. Si aad u hesho nuqullo bilaash ah oo qaab kale ama luqad kale ah, fadlan la xiriir Xiriirka Muwaadiniinta ee DCYF adigoo wacaya 1-800-723-4831 ama iimayl ugu dir communications@dcyf.wa.gov. DCYF PUBLICATION ADM_0039 SM (10-2026) Somali



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES